

Miyaad tahay Shaqaale Xilliyeed?



We speak your language 📞 13 1202

Are you a Seasonal Worker? – Somali

Waa maxay shaqo xilliyeedku?

Shaqo xilliyeedku waa shaqo kasta oo la helo qayb (ama qaybo) keliya oo sannadka ka mid ah, sannad kasta. Shaqooyin badan oo ah kalluumeysiga, beeraha iyo dalxiiskuba waa shaqooyin xilliyeed.

Shaqooyinka xilliga waxaa ka mid noqon kara:

- miro gurida
- kalluumeysiga
- shaqada abuurku markuu soo go'o
- dhoqor xiirista
- shaqada wershada ay waxyeelaysay xiritaanku.

Haddii aad dooneysid inaad codsato:

- Newstart Allowance (Lacagta Shaqadoonka)
- Youth Allowance (Lacagta Dhalinyarada) (oo aan ahayn ardeyda wakhtiga oo dhan wax barata)
- Parenting Payment (Partnered) (Lacagta Waalidka (isqaba))
- Widow Allowance (Lacagta Garoobka)

IYO

Lixda bilood ee ka horeeya gudahood intaadan sameyn codsiga adiga (ama ninkaagu) inay dhammaadeen, qabashada shaqo xilliyeed, waxaa laga yaabaa inaad sugto wakhtigii lacagta lagu siin lahaa sababtuna ay tahay lacagtii aad heshay intii aad shaqeynaysay. Tan waxaa la yiraahdaa Seasonal Work Preclusion Period (xilliga Aan ku jirin Shaqo Xilliyeedka).

Wixii macluumaad dheeraad ee af somali ah, wac 13 1202* ama gal website kayaga oo ah www.centrelink.gov.au

* Wicitaannada lambarrada ka bilawda «13» oo laga soo waco adeegga taleefoonka caadiga ah waxaa laga soo wici karaa meel kasta oo Australia dhexdeeda ah qiimuhuna wuxuu la mid yahay wicitaanka degaanka (qiimaha wicitaannada way is-badeli karaan ayadoo hadba ku xiran adeeg-bixiyaha taleefoonka laga soo wacay). Wicitaannada lambarrada ka bilawda «1800» waa lacag la'aan. Wicitaannada loo adeegsado taleefoonka dad-weynaha ee lacagta lagu dirsado ama moobaylka waxaa lagu dallaci karaa qiima sare.

Waa maxay micnaha ay kuu sameynaysaa adiga?

Haddii shaqada aad haysay ay fuliso sharaxaan, oo lacagta lagu siiyeyna ay sareyso waxaa la xisaabinayaa Xilliga hore isaga ilaalinta shaqo xilliyeedka si loo go'aamiyo inaad sugaysid kahor intaan lacag lagu bilaabin. Haddii shaqadii kuugu danbeysay ay socotay wax ka badan hal sanno, amase aad urursatay lacag fasax intii aad shaqeynaysay, kuma saameyn doonto.

Haddii aadan hubin in ay ku saameynayso iyo in kale, la hadal Centrelink.

Intee buu le'eeg yahay xilliga hore isaga ilaalintu?

Haddii lacagta aad qaadan jirtey ahayd Average Weekly Ordinary Time Earnings (Lacagta Wakhtiga Caadiga ah Celcelis ahaan Toddobaadkii) — \$948 qofka kalida ah iyo dadka lammaanaha ah \$1 896 toddobaadkii, Febaraayo 2004, ka dib waxaa laga yaabaa inaad sugto ilaa wakhti ka hor intaadan xaq u yeelan. Ka arag Centrelink xisaabta saxda ah.

www.centrelink.gov.au



Australian Government



giving you options

MCLW009.0512SOM (page 1 of 1)